

Ku Laabashada Guriga Kadib Fatahaadaha

Biyaha fatahaadaha ee gurigaaga gudiisa iyo hareerhiisa gaadhay waxay sababi karaan dhaawacyo iyo dhibaatooyin caafimaad. **Haku noqonin gurigaaga illamaa iyo sarkaalo ka socda magaalada ama degmada ay xaqiijiyaan inuu yahay ammaan biyuhuna inay ka yaraadeen.**

Eeg dibada gurigaaga.

- Ka fogow waayarada korontada ee soo dhacay, meelayawga gaaska soo daynaya, ama taangiyada shidaalka ee waxyeeladu gaadhay.
- Hagalin guriga haddii ay waxyeello gaadhay qaab dhismeedka sida haddii ay dildillaacyo cusub jiraan, dhibaatooyinka saqafka sare ah ama gidaarada oo meeshoodii ka riixma.
- Haddii aad uriso gaaska dabiiciga ah (sida ukun xumaatay) ama cod (hissing) ka tag goobta islamarkaba wacna wakaalada maxalliga ah ee ka mas'uulka ah adeegyada guriga.

Bakhtii korontada.

- Haddii biyo ku jiraan gurigaaga oo aad ka bakhtiin karto korontada adigoo ka tiigsanaya meel qallalan, markaasi bakhtii korontada.
- wac farsamo yaqaan korontada ah si uu u bakhtiiyo. **MARNABA ha shidin oo ha bakhtiinin korontada ama ha isticmaalin qalab elekteroonig ah marka biyo ay ku jiraan guriga.**
- Marnaba ha isticmaalin matoorka dabka dhaliya ama injiin ku shaqeeyo gasoline gurigaaga gudihisa, guriga qaybta dhulka hoostiisa ah, ama geerashka ama masafo ka yar 20 fiit in u jirta daaqad, albaab, ama tuubo hao.

Xaqiiji in biyaha iyo cunnadu yihiin kuwo ammaan ah.

- Raac ogeysiisyada ka imanaya degmada ama magaalada ee sheegaya in biyahaagu yihiin ku ammaan ah oo lacabi karo.
- Haddii aad biyo ka hesho ceel, ha isticmaalin biyaha illaa la tijaabinayo. Isticmaal biyaha caagadaha ku jira ama kulayli biyaha ugu yaraan hal daqiiqo si aad u cabi karto waxna ugu karsan karto. Haddii biyahaagu ur udgoon leeyihiin ama ay urayaan sidii shidaal ama kimik, ha cabin.
- Tuur cunnada ay biyaha fatahaadu soo gaadheen ama biyaha duufaanku iyo cunnooyinka aan si sax ah loo tallaajadayn.

Nadiifi kana hortag inay caaryadu samaysanto.

- Xidho maryo ku ilaalinaya sida surwaal iyo shaadh gacmo dheera ah, buudhka shaqada ee biyaha celiya, galoofyada caagga ah, muraayadaha indhaha, iyo maaskaraha N95.
- Caruurta, dadka leh xanuunada dhanka neefsiga iyo dadka difacooda

jidhku yahay daciif waa inaany kaa caawinin nadiifinta kadib marka fatahaaduhu dhacaan.

- Fur dhammaan albaabada iyo daaqadaha ay ka midka yihiin meelaha gudaha iyo saqafka sare ah ee ay hawadu kasoo gasho si ay hawadu usoo gasho.
- Haddii gurigaaga ay fatahaaduhu soo gaadheen uuna xidhnaa dhow cisho, utixgeli gurigaagu inuu leeyahay caaryo. Si aad u nadiifiso gurigaaga, isticmaal iyo marawaxado, aad dul saartay daaqad ama albaab si uu hawada dibadda ugu saaro oo aanu ugu soo celinin gurigaaga si aanu ufaafinin caaryada.
- Ha eego oo ha nadiifiyo farsamo yaqaan ku xirfad leh nadiifinta caaryada nidaamka kulka, hawaynta, iyo qaboojinta (HVAC) **ka hor inta aanad shidin** si aad uga hortagto inay caaryadu ku faafto guriga.
- Nadiifi walxaha caaryada leh ee aan biyaha nuugin (sida muraayada, caagga, marmarka, granite, ceramic tile, birta) aigoo ku nadiifinaya saabuun iyo biyo. U isticmaal nadiifiyaha wasakhda dila kolba sidii loogu baahdo.
- Dhaq maryaha iiyo dharka kale. Waxa aad ubaahan kartaa inaad turro walxaha sida fudud unuuga biyaha (sida barkimooyinka, furaashyada, drywall, roogaga, gidaarada kulka celiya, iyo saqafka).